2022

Kabka Magaalada Seattle ee Milicsiga

(Shaqaalaha leh Caymisk *Most** Faa'ido Badan)

Xaq ulahaanshaha: Shaqaaleysiinta iyo ku tiirsanayaasha cusub, caymisku wuxuu bilaabmayaa maalinta koobaad ee shaqaaleysiinta haddii taariikhdaasi tahay maalinta koobaad ee jadwalka bisha loo asteeyey maalinta ganacsiga Magaalada. Ama caymisku wuxuu bilaabmayaa maalinta bisha jadwalka loo asteeyay ama loo aqoonsaday taariikhda maalinta koowaad ee qaybta laguu asteeyay. Haddii shaqadaada bilaabato taariiqdaan kadib, caymiskaaga wuxuu bilowdaa maalinta koowaad e bisha xigto.

Dadka ku tiirsan ee Uqalma: Shaqsiyaadka u qalma caymiska oo ay kujiraan xaaskaaga ama lamaanahaaga qoyska, caruurta aad dhashay ama kuwa aad korsatay ama caruurta jooga goobta korsashada, caruurta lamaanahaaga ee adiga kula nool, caruurta aad adeerka u tahay ee adiga kula nool, iyo cunug kasta oo aad katahay masuul ama cida caymiska uga baahan Amarka Taageerada Caafimaadka Cunuga U Qalma. Carruurta dadka weyn waxay u qalmaan caymiska haddii ay ka hooseeyaan da'da 26. Haddii aad ku dartid dadka lagu tiirsanyahay, waxaa lagu weydiinayaa waraaqaha lagu cadeynayo u qalmidooda ee caymiska oo dhinaca qorshooyinka Caasimada Seattle.

Diiwaangelinta: Waa inaad iska diiwaangelisaa 30 maalmood gudahood ee ka bilaabaneyso kireysiga. Haddii aad ku guuldareysatid inaad iskaga diiwaangelisid 30 maalmood gudahood ee taariikhdaada shaqaalaysiinta, waxaa si toos ah lagaaga diiwaangelinayaa caymiska ilkaha iyo caymiska araga aasaaska ah. Caymiska ilkahaaga wuu ka guul dareysanayaa qorshaha Delta Dental of Washington. Haddii aad dhowaan noqotey qof u-qalma caymiska caafimaadka oo aadan si firfircoon u dooranin ama aadan ka tanaasulin caymiska caafimaadka, waxaa si otomaatig ah lagugu diiwaangelin doonaa qorshaha shaqaalaha keligiis ah ee Aetna Traditional, taas oo aan u baahnayn inaad wax lacag ah ku bixiso.

Ilkaha: Waxaad dooran kartaa Qaybta Ilkaha ee Delta ee Washington ama Adeegyada Caafimaadka Ilkaha. Qorshooyinka ilkaha waxaa ku jiro caymiska ee dadka ku tiirsan ee u qalma. Lacagta caymiska waxaa lagu daboolay si buuxdo Caasimada Seattle.

Aragga: Waxaad dooran kartaa Asaasi ama Qorshaha Buy-up oo ay kujiraan VSP. Baaritaanka indhaha sannadlaha wuxuu ku daboolan yahay kaleendarka sannad walba oo labada qorshooyin ah. Magaaladu waxay si buuxda u bixisaa lacagta caymiska qorshaha aasaasiga ah. Waxaad kaga qaybqaadatay $10.38 qorshaha Iibka, kaas oo wanaajiyay xulashooyinka indho-xidhashada.

Caafimaadka: Waxaad ka dooran kartaa Qorshaha Heerka Kaiser Permanente, Qorshaha laga jari karo ee Kaiser Permanente, Qorshaha Aetna Preventive, ama Qorshaha Aetna Traditional. Qarashka bil-laha ee adiga mid walboo qorshooyinka waa sida xigta:

	Kaqayb qaadashada Bilaha ah ee Shaqaalaha Kujira	
Qorshaha Caafimaadka	**Shaqaalaha****	**Shaqaalaha & xaaska/lamaanaha qoyska****
Ka hortaga Aetna	$48.12	$98.50
Dhaqanka Aetna	$0.00	$32.34
Heerka Kaiser Permanente	$48.40	$99.90
Kaiser Permanente Laga jari karo	$25.00	$56.92

**oo ay kujiraan caruur ama aanay caruuri kujirin

Adeegyada u Doodista: Shaqaalaha iyo xubnaha qoyska ee caymiska ku jira waxay xaq u leeyihiin adeegyada u-doodidda ee Accolade. Kalkaaliyaasha Caafimaadka ee Accolade waxay bixiyaan taageero shakhsiyeed oo fool ka fool ah oo bilaash ah. Kalkaaliyayaasha caafimaadka ayaa ah meel la sii maro oo looga jawaabo su'aalaha caafimaadka iyo gunnooyinka, waxayna la shaqeeyaan koox dhakhaatiir ah, kalkaaliyeyaal iyo khubaro takhasus u leh gunnooyinka si ay gacan uga geystaan ka tilmaan bixinta nidaamka daryeelka caafimaadka.

Akoonada isticmaalka Dabacsan (FSA): Maamulka waxay bixiyaan Daryeel Caafimaad (Health Care) iyo Xannaano Maalmeedka FSA (Day Care FSA) iyada oo la soo marinayo Navia Benefits Solution. Daryeelka Caafimaadka FSA wuxuu kuu ogolaanayaa inaad isticmaashid doolarada canshuurta hore si aad u heshid lacag celinta ee caafimaadka u qalma, ilkaha, iyo. Daryeelka Maalinta FSA waxay kuu ogolanaaysaa inaad hesho lacag celinta kharashaadka daryeelka maalinta ee ilmaha kugu tiirsan ilaa uu gaadhayo da'da 13 lamaanaha naafada ah/lamaanaha qoyska, ama waalidka kugu tiirsan. Waxaad dooran kartaa ugu yaraan $120 ilaa $2,750 sanadkiiba ee daryeelka caafimaadka FSA iyo $5,000 oo ah qorshaha Daryeelka Maalinta. Haddii aad dooratid inaad ka qeybqaadatid qorshahaan oo aad rabtid inaad sii wadid ka qeybqaadashadaada, waxaad u baahaneysaa inaad dib uga diiwaangelisid sannad walba inta lagu jiro muddada furnaanta Caasimada.

Waxa laga yaabaa in aad qaadato ilaa $550 maalgelinta FSA ee caafimaadka aan la isticmaalin laga bilaabo qorshaha sanadka 2022 ilaa qorshaha sanadka 2023 ilaa inta ay natiijooyinka la sameeyay ee cabirka akoonka ugu yar ee $120.

Aasaaska Caymiska Curyaannimada Mudddada Dheer Haddii aad curyaan noqotid, kadib 90-maalmood oo muddada sugitaanta ah, qorshaha ayaa ku siinayo aasaaska faa'idada ee $400 bishiiba adiga oo aysan kuu suurtogaleynin inaad shaqeysid. Lacagta caymiska aasaaska curyaannimada mudadada dheer waxaa si buuxdo ku bixiyaa Caasimada. Waxaad haysataa iqtiyaarka lagu iibsanayo faa'idooyinka curyaannimada muddada dheer (fiiri hoos).

Dheeraadka Caymiska Curyaannimada Mudddada Dheer (Supplemental Long-Term Disability Insurance) Iibso dheeraadka caymiska curyaannimada mudddada dheer si ay kuu siiso illaa boqolkiiba 60% ee salka mushaarkaaga ee ka badan $667 illaa ugu badnaan $8,333 bishiiba.

Basic Group Term Life Basic Insurance (Caymiska Aasaaska Nolosha Mudadada Kooxda Aasaaska) : Waxaad ka dooran kartaa mid ama labo qorshooyinka – Basic Group Term Life Insurance kaas oo ah hal iyo bar waqtiyada daqliyadaada sannadlaha ama Limited Basic Group Term Life Insurance oo ah $50,000. Magaaladu waxay kaqayb qaadan doontaa 40% ee kharashaadka Mudada Kooxda Caymiska Nolosha.

*Oo ay ku jiraan: CMEOs, Hogaamiyaasha Dab-demiska, Shaqaalaha Guud ee Magaalada, shaqaalaha Maktabada, xubnaha SPMA Hogaamiyaaka Dab-demiska iyo CMEOs- kala xidhiidh HR kaqayb qaadashadaada.

Supplemental Group Term Life Insurance (Caymiska Nolosha Muddada Kooxda Dheeraadka ah): Haddii aad dooratid Basic Group Term Life, waxaad iibsan kartaa caymiska muddada nolosha la dheeraadka ah nafsadaada, xaaskaaga/lamaanahaaga qoyska, iyo carruurta. Caymiska nolosha ugu badan ee aad heli karto waa afar laab dakhligaaga sanadlaha ah. Xaaskaaga/Lammaanahaaga gurigu waa 100% xadiga caymiska aad adigu dooratay ilaa ugu badnaan $500,00. Waxaad u iibsan kartaa $2,000, $5,000 ama $10,000 ee caymiska carruurtaada.

Dhimashada Shilka iyo Xubin go'a Caymiska (AD&D): Waxaad iibsan kartaa caymiska AD&D adiga ama qoyskaaga. Caymiska waxaa lagu heli karaa ka bilow $25,000 illaa $500,000.

Shaqo ka fariisiga

Shaqa ka fariisiga Shaqaalaha Caasimada Seattle Nidaamka (SCERS I iyo II): Waxaa jira laba qorshe hawlgab oo loogu talagalay shaqaalaha Magaalada oo ku kala duwan tabarucaadka, da'da hawlgabka ugu yar, celceliska mushaharka ugu dambeeya, iyo faa'iidada la kasbado sannadkii ee badiyaa adeegga.

SCERS I (la shaqaalaysiiyay ama iska diiwaangeliyay ka hor Janaayo 1, 2017): Waxaad ku tabarucday 10.03% iyo Caasimada sidoo kale waxay bixisaa 15.29% ee mushaarkaaga ah ee dhinacyada shaqo ka fariisigaaga.

SCERS II (la shaqaalaysiiyay Janaayo 1, 2017 ama ka dambeyso): Waxaad ku tabarucday 7.0% iyo Caasimada sidoo kale waxay bixisaa 14.42% ee mushaarkaaga ah ee dhinacyada shaqo ka fariisigaaga.

Kaqaybqaadashada iyo dakhliyada canshuurta dib loogu dhigay. Waxaad 100% ku ilaalsantahay tabarucidaada iyo daqliyadooda. Waxaad noqotay mid ilaalsan (u qalma faa'idada bil-laha ee da'da shaqo ka fariisiga) oo adeega shan sanno ah. Haddii aad ka tagtid shaqada Caasimada ka hor shaqo ka fariisigaaga iyo ka laabashada tabarucidaada, uma qalmeysid wax ka mid ah tabarucidaha Caasimada.

Haddii aad u shaqeysay gobolka ama dowladaha kale ee deegaanka, waxaad u qalmi kartaa inaad isugu geysid waqtigaaga adeega si aad ugu qalantid shaqo ka fariisiga.

Waxaad leedahay iqtiyaarka aad ku keydineysid wax ka badan shaqo ka fariisigaaga illaa City's Voluntary Deferred Compensation Plan (hoos fiiri).

Voluntary Deferred Compensation Plan (Qorshaha Magdhowga Dib loo dhigay ee Ikhtiyaarka ah): Isdiiwaangalinta Magaalada qorshaheeda 457 ee magdhawga raaga waa tabaruc. Waxaa laguu ogolyahay inaad ku deeqdid illaa ka jaridaha joornaatiga. Waxaad go'aansatay tirada doolarka, nooca tabrucaada iyo noocyada maalgashiyada. Waxaad ku deeqi kartaa sida yar ee $10 jeeg walboo lacag bixin ah. Iska diiwaangeli iyo isbadelada tabrucaada waxaa la sameyn karaa xili walba. Caasimada isma barbardhigto tabarucidaada.

Shaqada/Barnaamijyada Nolosha iyo Faa'idooyinka

Reach: Waxaad kaqeyb qaadan kartaa Reach, oo ah barnaamij ikhtiyaari iyo onleen ah oo la xiriira badqabka kaas oo loogu talagalay shaqaalaha iyo lamaanayaasha caymiska kujira. Reach waxay bixisaa nashaadaadyo firfircoon, aalado waxtar leh iyo maadooyin waxbarasho si ay kaaga caawiyaan inaad gaarto himiladaada dhaqaalaha, shucuureed, bulsheed iyo shaqo iyo inaad ku raaxeyso safarka.

Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (Employee Assistance Program EAP): Khayraadka ee Nolosha bixinta EAP ayaa adiga iyo xubnaha qoyskaaga ku siisa adeeg gudbin iyo latalin. Hel caawinaad sir ah oo ku saabsan arrimaha gaarka ah sida walbahaarka, niyad-jabka, dhibaatooyinka qoyska iyo xidhiidhka. Xubinta qoys walba wuxuu u qalmaa lix hal saac oo kulamo bilaash ah sameynta sannadkiiba.

Gaadiidka: Gaadiidka: Waxaad xaq u leedahay inaad hesho Kaadhka Baasaboorka ORCA, kaas oo si buuxda u bixinaya dhammaan gaadiidka dhulka ku salaysan, oo ay ku jiraan tagsiga biyaha iyo Doomaha Dadka qaada ee Kitsap. Waxaan sidoo kale bixinaa Vanpool iyo Doomaha Dadka Qaada ee Gobolka WA kaliya kababka rakaabka. Hadii aad isticmaasho doorashada inaad kaligaa ku safarto mid, waxaad sidoo kale xaq u leedahay Guri Raacid la damaanad qaaday - raacitaanka tagsiga ee dib loo celin karo haddii ay jirto dhacdo qoys ama xaalad degdeg ah oo caafimaad.

Career Quest: Career Quest waxay bixisaa fursadaha hormarinta shaqada la habeeyay si ay u balaadhiyo xirfadahaaga ama aad raadisid caawinta ee hadafyadaada shaqada muddada dheer. Si aad ugu qalantid, waa inaa dahaataa shaqaalaha Caasimada oo joogto ah, ka shaqeysay ugu yaraan hal sanno, oo aad balanqaaday inaad hormarisid xirfado cusub iyo aqoon.

Fasaxyada: Caaimada ayaa kormeerto 10 fasaxyada rasmiga ah iyo 2 fasaxyada shaqsiga ah. Waxaad qaadan kartaa fasax waqti walba oo ay la jirto ansixinta kormeeraha.

Fasax: Waxaad isu keentay fasaxa ku saleysan saacadaha heerka lacag bixinta joogtada ah. Tirada fasaxa la helay waxay ku xirantay baaxada adeegaaga—ka bilow 12 maalmood sannadkii oo shaqaalaha cusub illaa 30 maalmood sannadkii kadib 29 sanno oo shaqo ah. Saacadaha fasaxa aan la isticmaalin ee la sameeyay sannad walba kadib, illaa ugu badnaan, iyadoo ku xidhan sandaahaaga adeega.

Fasaxa Jirada : Waxaad isu keentay fasaxa jirada ee ku saleysan tirada saacadaah joogtada ah ee la shaqeeyay. Shaqaalaha waqtiga buuxo waxay helaan 96 saacadood ee fasaxa jirada sannadkiiba. Waxaad qaadan kartaa fasaxa jiradaada aan la isticmaalin, ma jiraan isku darka ugu badan.

Fasaxyada Kale: Caasimada waxay sidoo kale bixisaa fasaxyada xigga ee la bixiyo ama aan la bixin: fasaxa waalidnimada la bixiyo, fasaxa tacsida, fasaxa qoyska iyo caafimaadka, curyaannimada uurka, waajibaadka maxkamada, fasaxa waajibaadka milatariga, fasaxa deeqda ku beerida, fasaxa shaqsiga aan la bixin, iyo fasaxa borofeesarka.

Shaqaaluhu sidoo kale waxay haystaan ikhtiyaar ay ku dalbadaan Barnaamijka Fasaxa Caafmiaadka iyo Qoyska ee Mushaharkana Leh ee Washington (Washington Paid Family and Medical Leave Program) marka lagu daro fasaxyada kore ee laga helo Maamulka.

Seattle Human Resources

La cusboonaysiiyay 12/13/2021